NAGALA SOO XIRIIR!

Xafiiska Degmadda.....206.631.3000
Xarunta Qoyska.....206.631.3003
Gaadiidka.....206.631.7502
Adeega Caafimaadka.....206.631.3011
Diiwaan gelinta ardayga....206.631.3065
Xafiiska ELL ka.....206.631.3035
Waxbarashada Gaarka ah...206.631.3009
Qado lacag la'aan ah
ama qiimo dhiman.....206.631.3010

Xafiiska dhexe iyo Xarunta qoyska
15675 Ambaum Blvd. SW
Burien, WA 98166

SOO DAAHID LA'AAN MAALIN KASTA.

Ardada wakhtiga ilaalisa oo aan soo daahin sanad Dugidyeedka:

- Darajo fiican ayay ku gudbaan.
- Dugsiga Sare badankooda waa dhameystaan.
- Dabeecado wanaagsan ay yeeshaan oo surta gal ka dhiga in ay waxbarashada iyo mustaqbalka guuleystaan.

Ardada waxay ky qaadata sadex maalmood inay kasoo kabtaan hal maalin oo ay maqnaadaan.

@HighlineSchools

LA IMOW DABEECAAD FIICAN

Waalidka waxay door ka cayaaraan horumarka Ardayga

- Meel fiicaan oo si joogta ah ilmaha wax ku akhristo tus.
- La soco ilmaha horumarkiisa, iyo darajada uu keeno.
- Ilmaha warso himiladiisa waxay tahay iyo waxaad la jeceshahay inuu noqdo.
- Ilmaha kala hadal shaqooyin kala duwan una sheeg inay kala dooran karan.
- Wakhti yar ha ku qaatan combutarka iyo ciyaaraha oo ha badsadaan hurdada, ilmaha dugsiga dhexe waxay u baahanyihiin nasasho badan.

Dabeecadaha Ardada Guulaysata

- **Waxay ku dadaalaan hanaan shaqo:** *Tusaale: u diyaar garow iyo hanaan habeysan ayaa muhim ah oo lixda xisadood ay ku galaan maalin kasta.*
- **Waxay qabaan xirfado wax barashada u sahla.** *Tusaale: ka tasho nidaam waxbarasho iyo hanaan aad u bogto.*
- **Suaalaha ayay ku dadaalaan.** *Tusaale: Ilmaha oo macalinka ama saaxib warsada wixii uu shaki ka qabo.*
- **Waxay suubiyaan is dhex gal.** *Tusaale: Ardada waxay samaysan karaan saaxibo, waxay ku biiri karaan ururo ay la cayaaraan sbortiga.*
- **Maalin kasta waxbay akhristaan.** *Tusaale: Ilmaahaaga la soco wax akhriskiisa oo ka war hay.*

HALKAN NAGALA SOO XIRIIR

Lataliyaha Macalinka Magaciisa	Saacadaha Xafiiska Furanyahay
Lataliyaha Macalinka Emailkiisa	Taleefanka Xafiiska Guud #
Lataliyaha Macalinka Talefonkiisa #	Xaadririska #

highlineschools.org

SOO DHAWAADA

KU: FASALKA LIXAAD

XOGTA IYO MACLUUMAADKA LOO BAAHANYAAHAY

6

Every student is known by name, strength and need.

HIGHLINE PUBLIC SCHOOLS



Ardada Inay Ku Guuleystaan Maadooyinka

Si Ardada u guuleystaan Dugsiga Sare ka dib, dawladda waxa ay qeexday sida la rabo in maadooyinka sida Englishka iyo Xisaabta loo barto ilaa Fasalka 12aad. Dawladda waxay ahamiyad siisay kobciska fikirka, xalinta mashaakilka iyo xirfadaha ardada u horseedi kara horumar.

SAYNISKA

- In ahamiyad la siiyo Sayniska iyo wixii la hal maala si loo fahmo cilmiga dabiiciga ah ee dunida.
- In la sameeyo cilmi baadhis oo laga dooda qodobo la hal maala aqoonta Sayniska.
- In la barto aqoonta dhirta iyo dadka si loo fahmo xiriirka ka dhexeya iyo sida dabiciga ah ee ay u shaqeeyaan.
- In la sameeyo alaad sanaaci ah oo shegi karta cimilada.
- In la barto cimilada dunida iyo sababaha saameeya.

BARASHADA DAREENKA BULSHADA

- Ka qayb qaado shirarka Fasalka iyo Dugsiga.
- In la barto sida loo fahmo dareenka bulshada oo la adeegsado xirfado ku saahlaya inaad fahanto oo tilmami karto.

XISAAB

- Fahan macnaha saami quman, oo adeegso si aad u xalisho xisaabta.
- U adeegso fahankaaga isku dhufashada iyo isu qaybinta si aad u qaybiso jajabka.
- U adeegso fahaankaaga tirad inad ku fahanto tirooyinka buuxa (rational numbers).
- Arithmetic iyo aljabra.
- Sababee oo xalil hal isbarbardhig iyo tire sinaan la'aan ah.
- Falanqee xiriirka ka dhexeeya doorsoomayaal. madaxbanaan iyo qaar wax ku tiirsan.

FARSHAXANKALUQADAHA

Qoraal
- Qor sheekooyin, ku saabsan sharaxaad iyo dood.

Qoraal Suuganeed
- Sao xigo oo qeex fikirka muhimka ah ee sheekada oo faahfaahin ka bixi.
- Falnqee oo qeex farsamada iyo hab dhismeedka sheekada, ama qoraalka.
- Raad raac suubi oo qiimee isdhex galka aqoonta iyo fikradaha.

Qoraal Wareed
- Soo xigo oo qeex fikirka muhimka ah oo faahfaahin ka bixi.
- Falanqee oo qeex farsamada iyo hab dhismeedka warka.
- Raad raac suubi oo qiimee dhafnaanta aqoonta iyo fikradaha.

LUQADAHA DUNIDA

- Ka qayb qaado sanadka oo dhan xisadaha ku saabsan luqadaha aduunka.
- La imow straatijyad ku salaysan ku fiicnaanta luqadaha si kor aad ugu qaado xirfadaha akhriska, qoraalka iyo ku hadalka.

FASHAXANKA

- Aqoonta iyo xirfadaha farshaxanka u adeegso qoob ka ciyaarka, muusikada, masraxa iyo farshaxanka muuqda.
- Hanaanka farshaxanka uadeegso in fikrado lagu cabiro masraxa, muusikada iyo qoob ka cayaar.
- Fikirkaaga ku cabir farshaxanka.
- Isku xir farshaxanka iyo maadado kale, ama nolosha guud ahaan iyo dhaqamada.

JIMICSIGA IYO CAAFIMAADK

- Muuji karti aad ku fiicantahay jimicsi kala duwan.
- Ku dadaal inaad la timaado xilkasnimo iyo akhlaaq fiican oo ixtiraamto naftaada iyo dadka ka kale.
- Falanqee saamaynta ay qoyska, saaxibada, dhaqanka iyo teknoolajiyada ku leeyihiin caafimaadka.
- Muuji inaad adeegsato hadafkaaga si aad u kubciso xaaladda caafimaad.

CILMIGA BULSHADA

Taarikhda Dunidii Hore
- Fahan sida umadaha u unkameen, iyo xiriirka ka dhexeeya kuwa manta.
- Falanqee xadaaradihii hore adiga oo ka fiirinaya dhinaca Juqraafiga, dhaqaalaha iyo taarikhda.
- Is baal dhig ilaaha adiga oo hobsanaya in lagu kalsoonaan karo.

XOG DHEERAAD AH IYO MACLUUMAAD WAXBARASHO: highlineschools.org/guide

Ilmaahaga ka Taageer Wax Barashada Guriga

Maalin kasta (20-30 daqiiqo) daqiiqo ilmaha wax ha akhristo.

Ilmahaaga ka warso maadooyinka kala duwan oo suaalo ka weydii waxa ay baranayaan:

Suaal: Maanta maxaad kusoo akhriday fasalka?

Suaal: Maanta waxaad soo baratay tusaale ma firiin kara?

Suaal: waa maxay xiriirka kala dhexeeya nolosha caadiga ah?

Suaal: Maxaa kuugu adkaa, sidee se u xalishay?

ILMAHA SI JOOGTO AH ULA HADAL

Hadii wax suaal ah aad qabto, toos ula hadal macalinka oo ha sugin maalinta shirka.